# Waligay Guriga mar Kale ma ku noqon karaa Hadii Waalidkay Xaquuqdii laga Qaaday?

Can I Ever Go Home Again if My Parent's Rights Were Taken Away?

## Ma ku noqon karaa waaalidkay?

2013, Gobolka Minnesota waxa ay meel marisay Sharci la yiraa Sharciga Dib Isugu Celinta Qoysaska (Family Reunification Act). Sharcigani waxa uu u ogolaadaa xaakimada inay dib u soo celiyaan (dib u siin) xaquuqdii waalidka ee la joojiyey (looga qaaday) Maxkamada dacwooyinka Kurayda.

Tani waxa ay ka dhici kartaa uun xaalado kooban. Warqadan xogta aruursani waxa ay tilmaamtaa dib u soo celinta iyo waxyaabaha kale ee aad u baahan tahay inaad ogaato hadii aad doonayso inaad dib ugu noqoto guriga iyo waalidkaa.

## Waa maxay macnaha "Dib u soo celinta Waalidka ee sharciga ah iyo xiriirka ilmaha?"

Hadii Maxkamadu ay amarto dib u soo celin, taa macnaheedu waa:

1. Waxa aad mar labaad tahay sharciyan ilmo waalid xaquuqdiisii waalidnimo laga qaaday.

2. Waalidka xaquuqdooda waalidnimo laga qaaday waa waalidkaaga sharciga ah mar labaad. Dhamaan xaquuqdii iyo waajibaadkii waalid dib ayaa loo siiyey.

3. Waalidka waxa uu leeyahay hanta sharciga ah ee adiga.



Amarka dib u soo celinaya waalidka sharci ah iyo xiriirka ilmaha waxa uu quseeyaa uun waalidka ama waalidiinta lagu xusay magacooda codsiga maxkamada.

## Ma codsan karaa inaan u soo celiyo xaquuqda waalidka/ilmaha waalidkay?

Maya, kaligaa. Kaliya xeer-ilaaliyaha degmada ama waalid xaquuqdiisii waalidnimada laga qaaday ayaa ka codsan kara maxkamada dib u soo celinta. xeer-ilaaliyaha degmaddu ma uu codsan karo taa hadii aysan hay'ada ilaalinta ilmaha ee degmaddu aysan ogolaan in dib u soo celintu ay tahay maslaxada ilmaha. Kolkaa codsi ayaa la xareysan karaa. Codsi ayaa ah sidda

kaliya ee aad ku waydiisan karto maxkamaddu inay fal qaado. Marmarka qaarood, waxa aad waydiisan kartaa xeer-ilaaliyaha degmaddu inuu kuu xareeyo codsi adiga. Ka eeg boga ugu dambeeya ee warqadan xogta aruursani ku taal wixii akhbaar kale ah**.**

## Ciddee ayaa xaq u leh inay ka qayb gasho qaadida dacwada ee maxkamadda?

- Adiga, ilmaha
- Degmada
- Waalidka xaquuqdiisa loo soo celinayo
- Qofka maslaxadaada maxkamadu u magacowday (guardian ad litem) (kani waa qof gargaara da' yarta)
- Qabiilkaaga hadii uu ku quseeya sharciga la yiraa Sharciga Hagaagsanaanta Ilmaha Hindida ah (Indian Child Welfare Act).

Waxa aad xaq u leedahay in qareenkaagu uu joogo dhagaysiga dacwada.

## Xaalado noocee ah ayey maxkamadu soo celisaa xaquuqda waalidka?

Maxkamadu waxa ay amri kartaa "dib usoo celinta waalidka sharciga ah iyo xiriirka ilmaha kaliya hadii ay xukunto inay jiraan daliilo cad oo macquul ah oo ah in:"



1. dib u soo celintu ay maslaxadaada tahay ilmo ahaan
2. inaan qof aan ku dhalini uusan ku korsan ma qof kale
3. aadan ku jirin heshiis qoraal ah oo meeleyn ah oo qof korsi uu kuu qaadanayo adigoo ah qofka korsiga loo qaadanayo
4. ugu yaraan ay ka soo wareegtay 48 bilood markii la soo saaray amarkii ugu dameeyey ee joojinayey xaquuqdaada waalid (TPR)
5. wali aad la nooshahay dadkii laguu geeyey
6. aad doonayso inaad la noolaato waalidkaa
7. waalidku uu wax ka qabtay muskhulooyinkii keenay xayuubinta xaquuqda waalidka markii horeba,iyo
8. in waalidku ay diyaar u yihiin ayna awoodaan inay ku daryeelaan

## Ma jiraan marmar uu xeer-ilaaliyaha degmadu UUSAN xareyn karin dacwo si dib loogu soo celiyo xaquuqda waalidka?

Haa. Xeer-ilaaliyaha degmaddu ma xareyn karo codsi hadii:

1. Xaquuqdaadka waalidka la joojiyey "iyadoo lagu salaynayo helid xadgudub galmo inay dhacday ama fal kale oo keenay geeri ilmoood" ama

2. Waalidkaa lagu helay wax dambi ah oo lagu xusay liiska [Minn. Stat. §260C.007, subdivision 14.](https://www.revisor.mn.gov/statutes/cite/260C.007) Taasi waa liiska dambiyada "waxyeelada jaa'ifada" ah u gayta ilmaha.

## Ka wadan hadii inaan dib u soo celiyo xiriirka sharciga ah ee waalidka-ilmaha laakiin xeer-ilaaliyaha degmadu uusan xareyn codsi?

Marka ilmahu uu wali la nool yahay dadka loo geeyey ka dib kolkii xaquuqdii waalidka la joojiyey, maxkamadu waxa ay qabataa dacwo dhagaysi markii muddo la joogaba si ay dib ugu eegto hagaagsanaanta ilmaha.



Hadii 8 da waxyaabood ee kor lagu xusay ay run yihiin, adiga iyo waalidkaa waxa aad la xiriiri kartaan hawl-wadeenka bulshada ama xeer-ilaaliye degmo si aad u waydiisataan inay xareeyaan codsi dib isugu soo celin ah.

Adiga iyo waalidkaa waxaad kalood la xiriiri kartaan qofka maslaxadaada maxkamadu u magacowday (guardian ad litem). Ogaysii qofkaa maslaxadaada maxkamadu u magacowday (guardian ad litem) in waalidkaa ay hadda si amaan leh ay kuu daryeeli karaan adiga iyo in 2 diinu aad doonaysaan inaad dib isugu soo noqtaan.

Hadii aad lahayd qareen wakiil kaa ahaa kolkii Maxkamada kurayda la qaadayey, waa inaad la xiriirto qareenkaa. La socodsii qareenka sida arrimahu isu bedeleen waydiisana qareenka inuu taakuleeyo dib isugu soo celinta.



**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**